Xaquuqaha iyo Waajibaadka saaran Bukaanka:

Kuliyadeena Caafimaadka Ilkaha ayaa aqbasha dhammaan bukaannada qaba baahiyaha caafimadka ilkaha kuwaasoo ku habboon barista ardayda farsamooyinka casriga ah ee caafimaadka ilkaha ayadoon laga eegayn isirka, midabka, caqiidada, diinta, wadanka, jinsiga, da'da, xaaladaha guurka, naafada, xaalada caawimaada bulshada, xaalada ka mid ahaanshaha ciidanka, ama dookha galmada. Waxaa u taagan nahay inaan bixino daryeel tayo sare leh, oo qofka diirada saaraaya. Daryeelka diirada saaraaya qofka waa qaab loo fakaro loona sameeyo waxyaabaha kuwaasoo u arkaaya dadka adeegsada adeegyadeena iskaashato u siman qorshaynta, abuurista iyo kormeerka daryeelka si loo xaqiijiyo inay buuxinayso baahiyahooda. Tani waxay ka dhigan tahay inay gelinayso dadka iyo qoysaskooda ubucda go'aanada, la shaqaynta xirfadlayaasha iyo helitaanka natiijada ugu wanaagsan. Daryeel qofka diirada saaraaya maaha keliya in dadka la siiyo waxa ay rabaan ama la siiyo xog. Waa in la tixgeliyo doonista, mabaadii'da, xaaladaha qoyska, xaaladaha bulshada iyo qaab nololeedka dadka; u arkida qof mid gaar ah; iyo ka wada shaqaynta abuurista xalalka ku haboon.

Xaquuqdaada

- Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo qaab tixgelin, qadarin iyo sir dhawrid ah.
- Waxaad xaq u leedahay sirta la xariirta daawadaada caafimaadka ilkaha. Doodaha la xariira daryeelkaaga ayaa ahaan doona si u dhaxaysa adigga, ardayga daryeelka ilkaha ku siinaaya, dadka kale ee deegaanka ee taqasuska ka qaybgalaaya (haddii ay jiraan), iyo kuliyada kormeeraysa iyo/ama shaqaalaha ku habboon.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho xogta buuxda ee hadda ee la xariirta cudurka lagaa helay iyo daawaynta xaaladaada ilkaha, ayna ku jiraan waxa sababay, oo lagu sharxaayo qaab aad fahmayso.
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in laguu wareejiyo arday kale haddii aadan ku qancin ardayga dhakhtarka ilkaha ah. Hase yeeshee, codsiyada ah in arday kale laguu wareejiyo sababo la xariirta isir, diin, jinsi, da'da, naafo, dookh galmo, ama qabiilka ama meesha uu kasoo jeedo ayaan la fulin doonin. Codsiyada u wareejinta arday kale ayaa loo diraa Xafiiska Meelaynta Bukaanka ayadoo lala kaashanaayo kuliyada kormeerka samaynaysa.
- Waxaad xaq u leedahay inaad sii wadato daryeelka iyo dhamaystirka daawada.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho daawayn buuxinaysa heerka daryeelka xirfada leh
- Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato qorshaha daawaynta oo faahfaahsan, khataraha, faa'iidooyinka iyo dookhyada kale ee xaaladaada daryeelka ilkaha, ayna ku jiraan qarashaadka la qiyaasay, oo ku filan inaad na siiso oggolaansho faahfaahsan ee saxiixa kahor intaan wax daawayn ah la bilaabin. Daryeelka Xaalada Degdega ah ee nolosha khatar gelinaysa ayaa noqon karta shardi dhaaf.
- Waxaad xaq u leedahay inaad diido daawada, inaad fahanto khataraha daawo la'aanta, iyo in lagaaga waramo natiijooyinka laga filan karo daawooyinka kaladuwan ee laguusoo jeediyo.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho diiwaannada caafimaadkaaga ilkaha marka aad codsato aadna hesho sharaxaada xogta ama in laguu fasiro marka loo baahdo. Diiwaankaaga lama shaacin karo adoon fasax qoraal ah lagaa helin, marka laga reebo in uu sharcigu amraayo ama uu dalbado qarash bixiye qolo saddexaad ah. Qarash ayaa ku baxaaya koobi garaynta diiwaanadaada.

Waajibaadkaaga

- Waxaad masuul ka tahay inaad keento, intaad ogtahay, xogta saxda ah ee buuxda ee ku saabsan caafimaadkaaga hadda, cabashooyinka caafimaadka ilkaha, xanuunno hore, isbitaal lagu dhigay, daawooyin iyo xaaladaha kale ee quseeya caafimaadkaaga.
- Waxaad masuul ka tahay inaad soo sheegto isbadellada ku dhaca caafimaadkaaga lagasoo bilaabo balantii u danbaysay ee dhakhtarka ku daawaynaayay.
- Waxaad masuul ka tahay inaad u sheegto dhakhtarka haddii aadan fahmayn qorshayaasha daawada ee laguu sameeyay ama haddii aadan fahmin daawada lagu siinaauo ama waxa lagaa doonaayo.
- Waxaad masuul ka tahay inaad raacdo tilmaamaha lagu talinaayo ayna ku jiraan farsamooyinka kahortaga ah ee daryeelka guriga iyo daawaynta dabagalka ah ee uu ku siiyo ardayga caafimaadka ilkaha barta ama xubin ka socda kuliyada.
- Waxaad masuul ka tahay inaad qadariso dadka kale adoo samaynaaya nadaafada shaqsiga oo wanaagsan iskana ilaalinaaya adeegsiga carfiyaasha xoogan, baraafuunnada ama waxyaabaha jirka lagu buufsho.
- Waxaad masuul ka tahay inaad timaado balamahaaga xiliga loo asteeyay aadna diyaar u ahaato daawayn ugu yaraan labadii asbuucba mar ilaa daawayntaadu ka dhamaato. Haddii aadan awoodin inaad qabsato balan mudaysan, fadlan wac ugu yaraan 24 saac kahor.
- Waxaad xaq u leedahay inaad diido qorshe kasta oo daawayn ah oo laguusoo jeediyo, Kuliyada Caafimaadka Ilkuhuna waxay xaq u leedahay inay ku aqbasho bukaan ahaan. Waxaad masuul ka tahay waxyeelo kasta oo ku dhacda ilkahaaga ama xaalado kasta oo ka dhasha. Ardayga caafimaadka ilkuhu wauxuu keliya bixinayaa adeegyadaas ay kuliyada tababarka bixinaysa ku taliso ayna ogolaato.
- Waxaad masuul ka tahay inaad su'aalo na waydiiso marka aadan fahmayn xogta ama tilmaamaha.
- Waxaad waajib u leedahay inaad qadariso shaqaalaha xarunta caafimaadka iyo bukaannada kale ee xarunta caafimaadka jooga. Habdhaqanka fawdada iyo xushmad darada ah looma dulqaadan doono gudaha xarumaheena. Tani waxaa ka mid ah, laakiin aan ka xadidneyn:
    - Luuqad khaldan ama cay ah
    - Habdhaqan ishortaag ah oo caqabad ku noqonaaya badqabka dadka kale
    - Rabshad ama nooc kasta oo gacan qaad ah
    - Dhibaataynta galmada, isirka, ama diinta
    - Duubista codka ama muuqaalka dhakhtar, arday, shaqaale, ama bukaan
- Waxaad masuul ka tahay inaad si degdeg ah u bixiso dhammaan qarashaadka daawaynta aad hesho.
- Waxaa lagaa codsanayaa inaad iska ilaaliso ku adeegsiga taleefanka gacanta gudaha xarunta caafimaadka.